

Heerarka Guddiga aan Macaash doonka ahayn ee Dawlada Dhexe

Hordhac

Dhukumiintigani waxa uu bixinaya guudmarka heerarka muhiimka ah ee dawlada dhexe aqoonsan yahay 501(c)(3) guddiyada ururada aan macaash doonka ahayn. Waxaa loogu talagalay inay bixiso hagitaan guud oo ku saabsan shuruudaha sharciga dawlada dhexe. Waxay dhamaystiraysaa daabacaadda Nonprofit Association of Washington (NAWA) ee [Board Standards in Washington State](#). Guddiyada aan macaash doonka ahayn ee Washington waa inay dib u eegaan labada dhukumiinti si ay si wanaagsan u fahmaan shuruudaha ugu yar ee ay ugu shaqeyyaan si sharci ah oo ay u yareeyaan masuuliyadda xubinta guddiga. Shuruudaha muhiimka ah ee hoose waxaa kamid ah sharciyo haddii la jebiyo ay keeni karto mas'uuliyad shaqsiedyed xubnaha guddiga iyo sidoo kale khataraha soowajaha ururka.

Afeef

Dhukumiintigan waxaa loogu talagalay ujeeddooyin waxbarasho oo keliya. Looma jeedo in ay noqoto mid dhamaystiran, sinaba macluumaadkan looguma tixgelin doono sharci, ganaci, ama talo xirfadeed ama lataliye. Sidoo kale ma abuurto xidhiidh qareeno iyo macmiil. Wixii talo sharci ah, fadlan la xiriir qareen ruqsad haysta.

Dhukumeentigan waxaa la diyaariyay iyadoo lala kaashanayo Apex Law Group waxaana suurtageliyay taageerada Washington State Office of the Secretary of State



**Nonprofit Association
of Washington**



WASHINGTON
Secretary of State
Corporations & Charities Division



La cusboonaysiyyay Febraayo 10, 2023

Hubi in hadafkaas u horeeyo

- **ka Fogaw dheefaha gaarka ah.** Ururka 501(c)(3) waa in uu u adeegaa danta guud. Fahamka faa'iidata gaarka ah waxay mamnuucaysaa waxqabadyada faa'iido badan siiya shakhsiyad gaar ah marka loo eego ururka laftiisa ama ujeedooyinka samafalka ee ururka. Ha ku bixin lacag dheeraad ah shakhsii ama ganaci faa'iido doon ah alaabta ama adeegyada. Hubi in barnaamijyada ururku ay ka faa'iidaystaan koox balaaran oo dad ah, sida barnaamij siiya deeqo waxbarasho dadka ka soo jeeda Mexico halkii deeqaha waxbarasho ee xubnaha qoys gaar ah.
- **Ka Fogaw magdhawyada gaarka ah.** Xubnaha guddigu waa inay xaqijiyaan inaysan jirin "dheef gaar ah" oo ah hantida ururka ee u socota dadka kamidka ah ururka. Qofka ururka ka tirsan, wakhtiyada qaarkood waxaa loo yaqaan qof aan u qalmin, waa qof kasta oo saameyn ku leh ururka oo ay ku jiraan dhammaan

Heerarka Cuddiga aan Macaash doonka ahayn ee Dawlada Dhexe

xubnaha guddiga, saraakiisha, deeq-bixiyeyaasha wax ku oolka ah, aasaasaha ururka, iyo qof kasta oo la xiriira dhiig ama ganacsi. Xawilaada maaliyadeed kasta oo u dhaxeeya ururka iyo dadka ururka ka tirsan waa in si taxadir leh dib loogu eego si loo hubiyo in uu yahay ama ka hooseeyo qiimaha suuqa oo saxda ah oo uu cadaalad u yahay ururka aan macaash doonka ahayn. Habka ugu wanaagsan ee looga hortagi karo dheef gaar ah waa in la qaato oo la raaco xeerka iskhiliftaanka danta.

Sharchiyada muhiimka ee macaash doonta la'aanta waa inay raacaan

- **Xareeyan canshuur celinta Dakhliga Adeegyada Gudaha (Internal Revenue Service, IRS) 990.** Inta badan ururada aan macaash doonka ahayn ayaa looga baahan yahay inay xareeyaan canshuur celinta dawlada dhexe sanadlaho ah, ururada aadka u yarna waxay ku bedeli karaan ogeysiis sanadle ah oo ah foomka 990N. Iyada oo qayb ka ah xaraynta cashuurta, ururku waa inuu ka warbixiyaa oo uu bixiyaa cashuur dakhli kasta oo ganacsi oo aan xiriir la lahayn.
- **Raac sharchiyada shaqaalaynta.** Dhammaan shirkadaha leh shaqaaluhu waa inay raacaan sharchiyada shaqada. Shuruudaha dawlada dhexe muhiimka ah waxaa ka mid ah in si sax ah loo kala saaro shaqaalahaga iyo haysashada iyo bixinta canshuurta shaqada.
- **Raac shuruucda u ololaynta dawlada dhexe.** 501(c)(3) kuwa macaash doonka ah ayn waa inaysan xibsi la xiriirin. Markaad u dhaqmayso sidii wakiilka ururkaaga, waa inaadan waligaa ayidin ama ka hor iman musharax kasta oo u taagan xafiis dadweyne. Tani kama diidayso inaad taageerto ama taageerto musharraxinta noloshaada gaarka ah. U ololaynta arimaha, oo ay ku jiraan sharchiyo gaar ah, waa la ogolyahay ilaa iyo inta uu ururku ku jiro xadka la cayimay oo uu ka warbixiyo hawshiisa.
- **Haddii aad si caalami ah uga shaqeyso, raac xeerar maaliyadeed oo dheeri ah.** Hay'adaha Maraykanka ee u dhaqma si caalami ah waa inay u hogaaansamaan Shuruucda Hab-dhaqanka Musuqmaasuqa Wadanada Shisheeye ("FCPA") iyo Xafiiska Xakamaynta Hantida Wadanada Shisheeye ("Office of Foreign Assets Control, OFAC"). Xeerarkani waxay mamnuucayaan laaluush iyo musuqmaasuqa waxayna u baahan yihin inaad qaado talaabooyin aad kaga hortagayso in lacagaha la siiyo argagixiso.

Wax badan kaogaw:

Buug-gaceedka Ururka aan Macaash doonka ahayn ee Washington

- [Buug-gacmeedku wuxuu bixiyaa sharaxaadyo faahfaahsan oo ku saabsan shuruudaha sharciga](#)

Nonprofit Association of Washington

- [Waxyabaha Aasaasiga ah ee Macaash doonka ahayn](#)

Bolder Advocacy

- [Macluumaadka sharciga ololaynta ee dawlada dhexe](#)

National Council of Nonprofits

Heerarka Cuddiga aan Macaash doonka ahayn ee Dawlada Dhexe

- Kheyraadka Iskhilaafka Danta
-



**Nonprofit Association
of Washington**

Learn. Advocate. Collaborate.